


## Ciladbixinta Curiyaha Maqalka



### Daryeelka/dayactirka curiyaha maqalka

- Curiyaha maqalka badanaa biyaha waa u adkaystaa, mana ahan in aysan galayn
- Ha dhigin curiyaha maqalka meel qoyaal leh sida musqusha ama qubayska
- Mar walba ku kaydi curiyaha maqalka sanduuq adag (furka beetariga oo furan) si uusan u lumen ama wax u gaarin
- Ha uga tagin curiyaha maqalka meel kulul (tusaale. foornada, meylarowayf, baabuur kulul, iwm.)
- Ku rid qarshada qalajinta curiyaha mar kasta oo aad u malaysid in uu qoyay curiyaha maqalka
- Iska saar curiyaha maqalka ka hor inta aadan biyo is marin, aadan saliid marin dhagaha agtooda (tusaale. Saliida madaxa, buufinta timaha, gojada dhegaha, waxyaalaha qoraxda la iskaga mariyo, waxyaalaha xasharaadka la iskaga mariyo, iwm.)
- Si aad uga ilaalisid in uusan jabin, ka fogee curiyaha madalka in ay gaaraan xayawaanku, ilmuhu marka aan la isticmaalayn

### Maalin kasta waa in la fiiriyaa in wax lagu maqli karo

Fiirinta in wax lagu maqli karo waa subax walba, kahor baxnaanada isbitaalka, iskoolka iyo marwalba oo tabasho jirto.

Sidee loo fiiriyaa in wax lagu maqli karo maalin walba:

- Ka baar curiyaha maqalka iyo qaabeeyaha cilad – hubi sanduuqa in uusan dilaacsanayn, jabnayna, sidoo kalana aan biyo waxyeelin, qaabeeyahana uusan xirin dhukay. Ka baar qaabeeyaha iyo tuubooyinka qaabeeyaha qoyaal ama dilaac.
- Fiiri beetariga – Isticmaal qalabka lagu fiiriyo beetariga, taabsii calaamada + (kudarta) ku taala beetariga calaamada + (kudarta) ee fiilada qalabka baaridda sidoo kalana taabsii -(kajarta) ku taala beetariga -(kajarta) ee fiilada qalabka baaridda. Qalabka baaridda beetariga oo leh meel laga fiiriyo ayaa kuu sheegi doona in uu fiicanyahay ama u baahanyahay in la badalo. Beetariga waa in maalin walba la fiiriyaa, xataa haddii aad maalin ka hor galisay oo uu cusub yahay beetarigu.
- Isticmaal fursada waxmaqalka in dhagaysato curiyaha maqalka – Shid curiyaha maqalka marka aad xirtid albaabka beetariga shaqaynaya. Saar qaabeeyaha dhegta gambaleelka dhamaadkiisa. Afka kale saar dhegtaada. Dhagayso sharqamaha yeeraya; kadibna dhagayso codkaaga. Adigoo oranaya lixda sord ee Ling Six Sounds (ah, eee, oo, mm, sh, sss). Dhawaaqa kalmadaahani waa in ay maalin walba isku midyihiin.

Fiirinta maqlida iyo baaridda wax jaban waa in la sameeyaa maalin walba.

## Talooyinka Cilad Bixinta Guud

DHIBAATADA	XALKA
Curiyaha maqalka wax cod ah ma leh albaabka beetariga oo xiran	Fiiri qaabeeyaha dhegta tuubadiisu in ay xirantahay Badal beetariga Fiiri siddada deagtu in uu jabanyahay
Curiyaha maqalka oo codkiisu daciif yahay	Badal beetariga Dhagayso curiyaha maqalka uu ka maqanyahay qaabeeyaha dhegta – waxaa suurtoowda in wax owdayaan qaabeeyaha dhegta ama tuubada, ama tuubadu dilaacsantahay Fiiri siddada dhegtu in ay jabantahay
Codka curiyaha dhegta wuu go'goayaa	Badal beetariga Fiiri meesha beetariga la galiyo in ay jabantahay ama wasakhaysanyahay Fiiri in uu owdanyahay ama qoyanyahay qaabeeyaha dhegta/tuubada
Curiyaha maqalka oo sirgaxan ama codkiisu go'goayo	Badal beetariga Fiiri meesha beetariga la galiyo in ay jabanyahay ama wasakhaysanyahay Fiiri in qaabeeyaha dhegtu jabanyahay
The Ling Six Sounds are not clear Lixda dhawaaq si fiican loo maqli karo	Badal beetariga Fiiri meesha beetariga la galiyo in ay jabanyahay ama wasakhaysanyahay Fiiri qaabeeyaha dhegta tuubadiisu in ay owdantahay Fiiri siddada dhegtu in ay jabantahay
Curiyaha maqalka oo sharqamaya marka uu baabuurka ku jiro	Fiiri qaabeeyaha dhegta in si fiican ugu jiro Ka fiiri qaabeeyaha dhegta iyo tuubada in dilaac ku jiro Fiiri siddada dhegta in ay adgtahay

Haddii xalalka kor ku xusan aysan xalin dhibaatada curiyaha maqalka ilmahaaga, fadlan soo wac Children's Minnesota Hearing Aid Hotline oo taleefankoodu yahay 612-813-7610 wixii kale oo talooyin ah. Waxaa suurto gal ah curiyaha maqalku uu baahanyahay in hagaajiso aqooyahanka maqalka (Audiologist) ama warshada samaysay curiyaha maqalka (hearing aid manufacturer).

### Hearing Aid & Cochlear Implant Audiology Services

Appointment Scheduling: 612-874-1292

[hearingaids@childrensmn.org](mailto:hearingaids@childrensmn.org)

Repairs and Questions: 612-813-7610

[cochlearimplants@childrensmn.org](mailto:cochlearimplants@childrensmn.org)

#### Children's – Minneapolis

Children's Specialty Center  
2530 Chicago Avenue South, Suite 450  
Minneapolis, MN 55404

#### Children's – St. Paul

Gardenview Medical Building  
347 North Smith Avenue, Suite 600  
St. Paul, Minnesota 55102

#### Children's – Minnetonka

5950 Clearwater Drive, Suite 510  
Minnetonka, MN 55343

#### Children's – Woodbury

628 Bielenberg Drive, Suite 201  
Woodbury, MN 55125

#### Poison Help Line

Toll-free Poison Help Line: 1-800-222-1222

<https://poisonhelp.hrsa.gov/poison-centers>